

# Kordhinta Sicirka Biyaha ee la soo Jeediyay

Magaalada San Diego waxay soo jeedisay isbaddalo saamayn doono biilkaada biyaha.

## Macluumaadka Dhageysiga Dadweynaha

Waxaa la qaban doonaa dhageysiga dadweynaha ee la xariira kordhinta ugu badan ee laga soo jeediyay kharashka aan lagu talogelin biyaha sannadka 2023.

**Dhageysiga dadweynaha waxaa la  
qaban doonaa bisha Sateembar 20,  
2022, 2 p.m.**

Guddiga Magaalada wuxuu dhageysan doonaa iyo wuxuu tixgelin doonaa maragta afka laga soo jeediyay iyo qoraalada la soo gudbiyo ee ku saabsan kordhinta sicirka laga soo jeediyay dhageysiga. Guddiga Magaalada waxay awood u yeelan doontaa in ay isku celceliso kordhinta sicirka la soo jeediyay si ay uga jawaabto maragta afka laga soo jeediyay iyo qoraalada la soo gudbiyo si loo tixgeliyo. Waxaa la tixgelin doonaa cabbashooyinka qoran ee rasmiga ah ee hoos yimaada Qorshaha Magaalada 218 (City's Proposition 218) oo ah hababka jadwalada cabbashada dhamaadka dhageysiga dadweynaha, qof ahaan marka uu yimaado dhageysiga dadweynaha ama marka boostada loogu soo diro City Clerk, 202 C St., MS 2P, San Diego, CA 92101.

*Waxaad xaq u leedahay in aad  
cabbasho ka soo jeedisid kordhinta  
sicirka la soo jeediyay.*

Cabbashada qoran waa in laga helo oraah ku saabsan diidmada kordhinta sicirka, nambarka qiimeyaha dhulka ama ciwaanka hantida iyo magaca iyo saxixa milkilaha hantida ama macaamilka danabka ee soo diiwaan geliya cabbashada.

Hal cabbasho keliya ayaa laga soo jeedin doonaa halkii boos ama ciwaan. Cabbashada elatarooningga (email, fariimaha meediyyaha bulshada, iwm.) ma noqon doonto cabbasho qoran sida hoos timaado sharuudaha gobolka. Sida waafaqsan sharciga gobolka, dhageysiga dadweynaha waxaa laga soo deyn doonaa Tvga Magaalada iyo waxaa isla mar laga soo deyn doonaa bogga internetka Magaalada sandiego.gov/citytv. Waxaad macluumaad badan oo ku saabsan shirka Guddiga iyo faalada dadweynaha ka heli kartaa internetka sandiego.gov/city-clerk/officialdocs/council-agendas-minutes-results. Dhamaadka dhageysiga dadweynaha, Guddiga Magaalada (City Council) waxay tixgelin doontaa iyo waxay ogolaan doontaa kordhinta sicirka. Magaalada waxay tixgelin doontaa faalada afka laga soo jeediyio inta uu socdo dhageysiga dadweynaha balse ma ku sifeyn doonto sida cabbashooyinka rasmiga haddii aysan la soconin cabbasho qoran. Haddii, marka la gaaro dhamaadka dhageysiga dadweynaha, aysan inta badan milkiileyaasha hantida ama dadka daggan ee mas'uulka ka ah bixinta kharashka danabka, cabbashooyin qoran ka soo jeedinin, Guddiga Magaalada (City Council) waxaa loo fasaxi doonaa in ay dhaqan geliyaan go'aanka kordhinta kharashka dheeraadka aan lagu talogelin Haddii la dhaqan geliyo, kordhinta sannadka 2023 waxaa la dhaqan gelin doonaa Janaayo 1, 2023, waxaana bilaaban doono ololaha macluumaadka la siiyo dadweynaha si loo hubiyo la socodsinta macaamilka.

Sida Waafaqsan Xeerka Dawladda 53750 (Government Code Section 53759), waxaa jira sharciga muddada 120ka maalin ee lagu qaado talaabo sharci ama la soo gudbiyo dacwadaha ka soo horjeedo khidmadaha biyaha iyo wasakhda ama dallacaad.



# SOO JEEDINTA Khidmadaha Dheeraadka Aan Lagu Talogelin Biyaha


San Diego waxay aad isugu halleysaa biyaha laga keeno Northern California iyo Colorado

Wubiga. Taariikh ahaan, Magaalada waxay iibsatay qiyas ahaan 85% ilaa 90% baahida ay sannad kasta u qabto biyaha kana qaadato Madaxda Biyaha Dagmada San Diego (San Diego County Water Authority (SDCWA), taasoo kaddibna biyaha ka iibsata Metropolitan Water.

Dagmada Koofurta California Taariikh ahaan, SDCWA waxay kordhisaa sicirada biyaha ugu badan sannad kasta. Kordhintaan waxay ku saleysan yahiin kharashka SDCWA xagga waxyabaha la isticmaalo, hawlgalada, dayactirka iyo kharashka kale ee loo baahan yahay si loo helo biyaha wakaaladaha xubinta ka ah. SDCWA waxay isu keentay dhamaan kharashka ku baxa biyaha lagu soo dallaco ee loo gudbiyo wakaaladaheeda xubinta, sida Magaalada San Diego.

Bisha Juun sannad kasta, boorka SDCWA waxay ogolaasho siisa kordhinta jamlada sicirka biyaha taasoo kordhin doonto kharashka iibsiga biyaha Magaalada laga bilaabo sannadka xiga.

Dallacaadda Adeegga Biyaha Bil Kasta ee ugu Badan iyo Ugu Badan		
Cabbirka Mitirka	Dallacaad da Iminka Jirta	3% Kor u Kaca Kordhinta aan Lagu Talogelin
5/8", 3/4"	\$27,09	\$27,91
1"	\$35,87	\$36,95
1,5"	\$55,97	\$57,65
2"	\$81,08	\$83,52
3"	\$140,09	\$144,30
4"	\$224,22	\$230,95
6"	\$432,65	\$445,63
8"	\$683,77	\$704,29
10"	\$977,57	\$1 006,90
12"	\$1 813,79	\$1 868,21
16"	\$3 153,50	\$3 248,11



## Sicirada Badeecada Biyaha Iminka Jira iyo Sicirada ugu Badan

Qeypta Macaamilka	Dallacaadda Iminka Jirta	3% Kor u Kaca Kordhinta aan Lagu Talogelin
<b>Guriga Halka Qoys</b>		
Safka 1	\$/HCF)	\$5,415
Safka 2	\$/HCF)	\$6,065
Safka 3	\$/HCF)	\$8,664
Safka 4	\$/HCF)	\$12,183
Guryaha Qoysaska Badan	\$/HCF)	\$6,553
Ganacsiga/Warshadaha Dibadda Magaalada	\$/HCF)	\$6,394
Waraabinta	\$/HCF)	\$7,265
Dhismaha Ku Meel Gaarka	\$/HCF)	\$7,388
		\$7,610


Janaayo 1. Magaalada waxay soo jeedisay in ay gudbiso kharashka ay macaamiisha ah biyaha uga iibsadaan SDCWA taasoo ku saleysan sicirada ay soo ogolaato SDCWA bisha Juun 2022 ee sannadka 2023. Waxaa la saadaalin doonaa sicirada biyaha in ay kor u kacaan 3% si loo gudbiyo. Haddii saamaynta kordhinta SDCWA ku leedahay bixiyeyaasha sicirka Magaalada ka badan tahay 3%, Magaalada ma sii kordhin doonto sicirada. Magaalada waxay macaamiisha siin doontaa ogeysiis qoran muddo 30 maalin ka hor inta aan la gaarin taariikhda dhab ahaan la hirgeliyo kordhinta sicirka, taasoo aan ka badnaan doonin 3% dhamaan sicirada go'an iyo sicirada badeecada biyaha.

**Xasuus:** Magaalada khaashka ku soo dallacdaa macaamiisha halka qoys hal mar labadii bil. Tan macnaheeda waa in biilasha oo gaara macaamiisha waxaa ka jira kharashka lagu soo dallaco labo bil oo adeeg ah.

Macluumaadkaan waxaa lagu heli karaa qaabab kale marka la codsado.

## Dallacaadda Adeegga Leenka Dabka Iminka Jira iyo Dallacaadda Ugu Badan Bil Kasta

Cabbirka Mitirka	Dallacaadda Iminka Jirta	3% Kor u Kaca Kordhinta aan Lagu Talogelin
1"	\$4.03	\$4.15
1,5"	\$4.03	\$4.15
2"	\$6,24	\$6,43
3"	\$24,17	\$24,90
4"	\$30,90	\$31,83
6"	\$45,64	\$47,01
8"	\$64,46	\$66,40
10"	\$83,27	\$85,77
12"	\$99,37	\$102.36
16"	\$161,13	\$165,97
20"	\$200,62	\$206,64





9192 Topaz Way San  
Diego, CA 92123

HEERKA HORAY  
LOO SOOCAY  
\BOOSTADA  
MAREYKANKA  
LA BIXIYAY  
SAN DIEGO, CA  
RUQSADDA 134

## Ogeysiiska Dhageysiga Dadweynaha

TAARIKHDA: Sateembar 20, 2022

WAQTIGA: 2 p.m.

GOOBTA: 202 C St San Diego, CA 92101

Qolalka Guddiga waxay u furan yahiin marqaati  
furka qofka taga. Si aad u heshid macluumaad  
badan, fadlan booqo:  
[sandiego.gov/city-clerk/officialdocs/council-agendas-minutes-results](http://sandiego.gov/city-clerk/officialdocs/council-agendas-minutes-results).



Warqaddaan waxay  
muhiim u tahay  
dhamaan macaamiisha  
Magaalada San Diego  
(City of San Diego) oo  
ku qoran luqado kale  
waxaa laga heli karaa  
boggene internetka.  
Fadlan booqo  
[sandiego.gov/rate-increases](http://sandiego.gov/rate-increases)

## MACLUUMAADKA MUHIIMKA AH EE KU SAABSAN XUQUUQDAADA

Ogeysiiskaan waxaa ku soo gudbiyay Waaxda Danabka Dadweynaha ee Magaalada San Diego (City of San Diego Public Utilities Department) sida waafaqsan Qodobka XIID Dastuurka California (California Constitution Article XIID) (kaasoo loo qqaan "Tallada 218" ("Proposition 218"). Sida hoos timaado qdobada Qorshaha 218 (Proposition 218), Magaalada waxaa laga rabaa in ay ogeysiiso milkileyaasha hantida isbaddalada lagu sameyay khidmadaha la xariira hantida, sida biyaha iyo adeegga biyaha wasaqa.

Tani waa ogeysiis in Guddiga Magaalada (City Council) fullin doonto dhageysiga dadweynaha, waqtiga, taariikhda iyo goobta ku qoran kor, si ay u tixgeliso habbeynta la soo jeediyay kuna saabsan sicirada adeegga biyaha Magaalada iyo kharashka la soo dallaco. Haddii la ogolaado, isku celcelinta la soo jeediyay waxay marka kowaad ka muuqan doontaa biilasha laga bilaabo Janaayo 2023. Dhamaan xubnaha dadweynaha waxaa lagu casumay in ay yimadaan dhageysiga dadweynaha. **Kaddib, sida hoos timaado sharciga gobolka California, dhamaan milkileyaasha hantida iyo macaamiisha ku qoran diiwaan waxay cabbasho qoran ka soo gudbin karaan isbaddalada laga soo jeediyay sicirka. Cabbashada laga soo diro boostada waa in ay soo gaarto ugu dambayn Sateembar 20, 2022. Hal cabbasho keliya ayaa laga soo jeedin karaa halkii boos.** Waa la xaqiijin doonaa dhamaan cabbashooyinka qoran. Wuxaad kaloo ka muuqan kartaa dhageysiga dadweynaha ee la qaban doono taariikhda iyo waqtiga kor ku qoran. Macluumaad badan ayaa laga heli karaa internetka: [sandiego.gov/rate-increases](http://sandiego.gov/rate-increases).

Cabbashada qoran waa in lagu soo diro bakhshad ama loo geeyo: City Clerk, 202 C St., MS 2P, San Diego, CA 92101. Aniga-

\_\_\_\_\_ waan ka soo horjeedaa kordhintaa sicirka la soo jeediyay.

Nambarka Booska Qiimeyaha (Assessor's Parcel Number) ama Cinwaanka: \_\_\_\_\_

Saxiixa: \_\_\_\_\_